**Jamhuuriyadda Federaalka ee Soomaaliya**
GUDDIGA QARANKA SHAQAALAHA RAYIDKA EE DOWLADDA

جمهورية الصومال الفيدرالية
اللجنة الوطنية للعمال المدنى للدولة

**The Federal Republic of Somalia**
**NATIONAL CIVIL SERVICE COMMISSION (NCSC)**

**Ref: XGG/NCSC/1488/09/2026** **Taariikh: 19/09/2026**

**Ku: Dhammaan Wasaaradaha iyo Hay'adaha Dowladda** **Muqdisho**
**Og: Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda Federaalka Soomaaliya** **Muqdisho**

**Ujeeddo: Dhaqangelinta Amarka Ra'iisul Wasaaraha Tartanka Furan ee Shaqada Dowladda.**

Iyadoo la fulinayo tilmaamaha Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda Federaalka Soomaaliya ee ku taariikheysan **17 September 2026**, kuna saabsanaa Dib-u-habaynta Maamulka Wasaaradaha iyo Hay'adaha Dowladda iyo Hirgelinta Hannaanka Tartanka furan ee ku salaysan aqoonta iyo waayo-aragnimada shaqsiga.

Guddiga Shaqaalaha Rayidka ee Federaalka, isagoo gudanaya waajibaadkiisa Dastuuriga ah, waxaa uu dhaqangelinayaa Sharciga Shaqaalaha Rayidka ee Dowladda Qodobkiisa 7aad ee soo baxay **5 Dec, 2006,** iyo Xeernidaamiyaha 6aad ee Shaqo Qorista Shaqaala: -

1. Dhammaan xilalka Agaasime Waaxeedyada ku xusan qaab-dhismeedka hay'adeed ee la ansixiyey waxaa lagu buuxinayaa tartan furan oo gudaha ah (**Internal Merit-Based Recruitment**), kaasoo ay u siman yihiin shaqaalaha Wasaaraddaas/hay'addaas ee buuxiyay shuruudaha xilka. Hannaanka dib u habeynta waxaa lagu billaabayaa Agaasimaha Waaxda Maamulka Shaqaalaha, maadaama ay muhiim u tahay hirgelinta dib-u-habaynta Shaqaalaha.
2. Shaqo kasta oo bannaan ama mustaqbalka bannaanaata, waxaa lagu buuxin doonaa tartan furan, oo ay u siman yihiin muwaadiniinta Soomaaliyeed ee buuxiya shuruudaha shaqada la soo dhejiyay,
3. Guddigu waxa uu soo saari doonaa jadwalka, shuruudaha, habraacyada xulashada tartanka furan.

**Sidaas darteed, Wasaaradaha iyo Hay'adaha Dowladda, waxaan la socodsiinaynaa: -**

1. In aan la qaadin tallaabo maamul ama magacaabis cusub oo carqaladayn karta hannaanka dib u haybaynta shaqaalaha.
2. In shaqaalaha la gaarsiiyo farriintan, lana siiyo fursad loo siman yahay, iyo;
3. Dhammaan Wasaaradaha iyo Hay'adaha waxaa laga codsanayaa inay si dhow ula shaqeeyaan Guddiga, si loo xaqiijiyo hirgelinta amarka Ra'iisul Wasaaraha iyo dhismaha adeeg rayid ah oo ku salaysan karti, mudnaan, hufnaan, daahfurnaan iyo caddaalad.

**Fiira Gaar ah:** Gabdhaha ka hawlgala Wasaaradaha iyo Hay'adaha Dawladda ee buuxin kara shuruudaha, waa in lagu dheerigeliyaa in ay soo codsadaan boosaska la soo dhejiyo

**LIISKA WASAARAHA IYO HAY'ADAHA LEH AGAASIME WAAXEEDKA MAAMULKA SHAQAALAHA**

| # | Wasaaradda/Hay'adda |
|---|---|
| 1. | W. Amniga Gudaha |
| 2. | W. Arr. Gudaha, Federaalka iyo Dib Heshiisiinta |

Tell:0615521397 / 0615175950 / 0615883909
E-mail: chairperson@ncsc.gov.so Somalia_ncsc@hotmail.com, www.ncscn.gov.so

Baarlamanka Federaalka Soomaaliya
Golaha Shacabka
Guddiga Horumarinta Adeegga Bulshada

البرلمان الفيدرالي الصومالي
مجلس الشعب
لجنة تنمية الخدمات الإجتماعية

Federal Parliament of Somalia
House of the People
Social Services Development Committee

**REF:** G/SH/GHAB/0137/09/2026 Axad 21/09/2026

**Ku:** Guddoomiyaha Golaha Shacabka ahna Ku Simaha Madaxweynaha JFS

Og: Xubnaha Guddiga Horumarinta Adeegga Bulshada

**Og:** Xoghayaha Golaha Shacabka

**Og:** Waaxda Shuruucda Golaha Shacabka

**Ujeeddo:** Codsi Hakinta Amarka Ra'iisul Wasaaraha ilaa Laga Ansixinayo Xeerka Guddiga Shaqaalaha Rayidka.

**Mudane Guddoomiye/Ku Simaha Madaxweynaha JFS**

Iyadoo la tixraacayo warqadda summadeedu tahay XGG/NCSC/1488/09/2026, kuna taariikhaysan 19/09/2026, ujeeddadeeduna tahay "Dhaqangelinta Amarka Ra'iisul Wasaaraha ee Tartanka Furan ee Shaqada Dowladda", kana soo baxday Guddiga Shaqaalaha Rayidka Qaranka.

Guddiga Horumarinta Adeegga Bulshada, isagoo gudanaya waajibaadkiisa dastuuriga ah iyo kan xeer-hoosaadka, si waafaqsan Qodobka 94aad, faqraddiisa (9), Qodobka 95aad, faqraddiisa (2) ee Dastuurka JFS iyo Qodobbada 34aad, 50(11), 56aad iyo 59aad ee Xeer-hoosaadka Golaha Shacabka, wuxuu qiimayn sharciyeed ku sameeyey tallaabooyinka Xukuumadda ee la xiriira Guddiga Shaqaalaha Rayidka Federaalka.
Haddaba, Qiimaynta uu Guddigu sameeyey waxaa ka soo baxay gafafkaan sharciyeed ee soo socda:

1. Guddiga Shaqaalaha Rayidka ee hadda jira wuxuu ka kooban yahay afar iyo toban (14) xubnood, waxaana lagu dhisay Xeer Lr. 10 ee sannadkii 2006, kaas oo ku salaysnaa Axdigii Ku-meelgaarka ahaa ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya ee sannadkii 2004. Qaab-dhismeedkaasi ma waafaqsana Qodobka 158(3) ee Dastuurka JFS, oo dhigaya in Guddigu ka koobnaado shan iyo toban (15) xubnood oo Golaha Wasiirradu soo jeediyo, Baarlamaanka Federaalkuna ansixiyo, Madaxweynaha Jamhuuriyadduna Xeer Madaxweyne ku meel mariyo.

Tel: +252610807202 WhatsApp: +252610807202
Email: SocialAffairs.Committee@parliament.gov.so Nadra.Saleh@parliament.gov.so
Www.parliament.gov.so

# JAMHUURIYADDA FEDERAALKA

# SOOMAALIYA

# GOLAHA SHACABKA BJFS

## QARAARKA GOLAHA SHACABKA

**ee**

**LAALISTA XEER LR. 132 EE TR. 11/05/2023 IYO QARAARKA HIRGELINTA HANNAANKA TARTANKA FURAN EE SHAQAALAHA DOWLADDA EE DOOR-SOOCASHO EE KA SOO BAXAY XAFIISKA RA'IISUL WASAARAHA TR. 17/09/2026**

**MUQDISHO, 23/09/2026**

## GOLAHA SHACABKA BJFS:

**Isaga oo gudanaya:** Waajibaadkiisa Dastuuriga ah ee sharci-dejinta iyo kor-joogteynta hay'adaha Dowladda.

**Markuu arkay:** Soo-jeedinta Guddiga Horumarinta Adeega Bulshada ee ku saabsan laalista Xeer Lr. 132 ee Tar. 11/05/2023 iyo Qaraarka Hirgelinta Hannaanka tartanka furan ee door-soocashada lagu xulayo Shaqaalaha Dowladda tr. 17/09/2026 ee ka soo baxay Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha.

**Markuu garwaaqsaday:** In ay laga-maarmaan tahay in Guddiga Qaranka ee Shaqaalaha Rayidka Dowladda loo madax-banneeyo Guddashada Waajibaadkiisa, sida uu farayo Dastuurka iyo Sharuucda kale ee Dalka.

**Isaga oo ku kulansan** Kalfadhiga 8aad, Kulankiisa 18aad, Taariikh 23[ka] Sebteembar 2026.

### Wuxuu gudddoonsaday qaraarka halkaan hoose ku xusan

### Qodobka laad:

Laga bilaabo Maanta oo taariikhdu tahay 23/09/2026, Golaha Shacabka BJFS, waxa uu cod aqlabiyad ah ku laalay **(Guntan: 140, Ogol: 136, Diiday: 2, Ka Aamustay: 2)** Xeer Lr. 132 ee Tar. 11/05/2023 iyo Qaraarka Hirgelinta Hannaanka tartanka furan ee door-soocasho ee tr. 17/09/2026 ee ka soo baxay Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha

### Qodobka 2aad:

In Guddiga Shaqaalaha Rayidka Dowladda loo madax-banneeyo gudashada waajibaadkiisa iyo fulinta howlaha sharci ahaan loo igmaday ee ay ka mid tahay Shaqo Qoridda, Magacaabidda iyo Dallacsiinta Shaqaalaha Rayidka ee Dawladda, si waafaqsan Qodobada 159aad, 160aad, 161aad ee Dastuurka JFS iyo Sharciga Shaqaalaha Rayidka Dowladda ee Sharci Lr. 11, 2006, loona oggolaado in ay shaqadooda u gutaan si daah-furnaan iyo caddaaladi ku jirto, iyada oo aan lagu faragelin awoodaha iyo mas'uuliyadaha u gaarka ah, Sidoo kale Guddiga Shaqaalaha Rayidka Dowladda waxaa la farayaa in ay Warbixintooda u soo gudbiyaan Golaha Shacabka BJFS.

Guddiga Madaxabanaan ee Shaqaalaha Rayidka Dowladda waxaa la farayaa inay u hogaansamaan kala madax banaanida Lamaha Hay'addaha Dowladda ee Fulinta, Garsoorka iyo Sharcidejinta ee la xiriira arrimaha Shaqaalaha.

## Qodobka 3aad:

Xukuumadda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, waxaa la farayaa in ay soo gudbiso sharciyada la xariira dib-u-habeynta iyo casriyaynta Shaqaalaha Rayidka Dowladda, si waafaqsan Dastuurka iyo Sharuucda kale ee Dalka u yaala.

## Qodobka 4aad:

Guddiga Qaran ee Shaqaalaha Rayidka Dowladda waa la farayaa in shaqo qorista iyo dalacsiinta ay ku saleeyaan nidaam tartan daah-furan oo loo siman yahay, kana fog eex iyo ku tagri-fal awoodeed, iyada oo la raacayo hab-raac shaqo qoris oo waafaqsan sharuucda Dalka.

## Qodobka 5aad:

Qaraarkaan waxa uu dhaqangalayaa manta oo ah Arbaco 23ka Sebteembar 2026, waxaana saxiixay:

**M.ne Cabdullaahi Cumar Abshir**
**Ku-Simaha Guddoomiyaha Golaha Shacabka BJFS.**